

# Waraaqda Xaqiiqooyinka Xeerka Cuntada #14

Waxa loo baahan yahay in aad ka ogaato Xeerka

WWW.HEALTHOREGON.ORG  
/FOODSAFETY

OAR 333-150-0000,  
CUTUBKA 3-502.11

Shirkadda cuntadu waa in ay kala duwanaanshaha ka heshaa wakaaladda maamulka sida ku cad § 8-103.10 iyo § 8-103.11 kahor: <sup>Pf</sup>

(H) Iniinaha ama digirta curdanka ah. <sup>Pf</sup>

## SABABAHA LA XIRIIRA CAAFIMAADKA BULSHADA:

Ilaa 1995, iniinaha curadanka ah ee cayriinka ah waxay kusoo shaac baxeen in loo aqoonsaday il uu ka yimaado cudurka cuntada ka dhasha gudaha Maraykanka. FDA iyo CDC waxay soo saareen talooyin caafimaad oo ku saabsan in dadyowga khatarta badan ugu jira cudurka cuntada ka dhasha ay ka fogaadaan cunista alfalfa curdanka ah ee cayriinka ah ilaa laga gaarayo wakhti ay gaaraan qaab wax looga qaban karo oo diyaarsan si sare loogu qaado badqabka wax soosaaradaan.

Maadaama oo aan la helin hal daaweyn oo si buuxda u ciribtiraysa jeermisyada, FDA waxay ku talinaysaa in la sameeyo shaybaar nooleyaasha il ma aragtayga ah oo ku saabsan biyaha loo isticmaalay waraabka. Baaritaanka xaqiijinta waxa lagu samayn karaa isla goobta cuntada tafaariqda ah iibisa haddii qalab ku filan iyo qof xirfad u leh la helo ama waxaa qandaraas lagu siin karaa shaybaaro gaar loo leeyahay si ay u sameeyaan tijaabooyinka lagama maarmaanka ah. Daaweynta iniinta lagu jeermis dilayo oo la samaynayo si waafaqsan baaritaanada shaybaarka waxay yaraynaysaa in ay dhacdo in la iibiyo wax soosaar wasakhaysan. Baaritaanka waa in lagu sameeyaa jeermisyada laga walaacsan yahay, *E. coli* O157:H7 iyo *Salmonella* labadaba.

## Iniinyaha ama Digirta Curdanka ah

Wax soosaar cusub ayaa muhiim u ah cuntada caafimaadka laga helo. Si kastaba ha ahaatee, wax soosaarada qaar, oo ay kamid yihiin kuwa curdanka ah, waxaa lala xiriiriyaa cudurada cuntada ka dhasha. Curdanka cayriinka ah iyo kan wax yar la kariyay, khaasatan digirta curdanka ah ee alfaalfa, clover iyo mug, waxaa lala xiriiriyay cudurada cuntada ka dhasha tiro marar ah oo ay dilaaceen. Nooleyaasha ilma-aragtada ah ee iniinaha kujira ama loo keenay intii lagu jiray hanaankii koritaanka curdanka waxay si dhakhso ah u kori karaan inta lagu jiro xaaladaha caadiga ah ee biqilidda iyo curdanka. Ayada oo tani sabab u tahay, waxaa hadda loo baahan yahay in aad haysato qorshe kala duwanaansho iyo HACCP si aad iniinyaha ama digirta ayaka oo curdan ah ugu koriso deegaanka maqaaxida.

Curdanka waxaa lagu qeexaa nooca iniinta soo koraysa iyo digirta. Tusaalayaasha curdanka waxaa kamid ah:

- Alfalfa
- Clover
- Gabal-dayaha
- Broccoli
- Mustard
- Radish
- Toonta
- Dill
- Mung
- Digirta nooca Kidney/pinto/navy
- Digirta soy
- Qamadiga (cawska qamadiga)

Ma jirto hal daaweyn ilaa hadda taasoo muujinaysa in ay si buuxda u ciribtiraysa jeermisyada iniinaha kujira ama curdanka kuwaas oo sababa xanuunka cuntada ka dhasha ayada oo aan saamaynayn geedka soo koraya ama wax soosaarkiisa. Sidaa darteed, talaabo kasta oo kahortag ah waa in la

qaadaa si looga hortago heerarka sare ee bakteeriyada ku koraysa iniinaha ama curdanka. Isticmaalka "Xeerarka Ugu wanaagsan" ee shirkadaha curdanka ee tafaariqda ee soo socda ayaa gacan ka gaysan karta xaqiijinta waxsoosaar caafimaad qaba oo badqaba. Xeerarka ugu wanaagsan waxaa si onleen ah looga heli karaa: <http://www.fda.gov/Food/FoodSafety/RetailFoodProtection/ucm078758.htm>.



### Curdanka digirta Mung iyo alfalfa waxaa inta badan laga isticmaalaa maqaaxiyaha

Macluumaad dheeraad ah ayaa laga heli karaa websaytka FDA, <http://www.fda.gov>, ayada oo la galinayo "curdan" bogga wax laga baaro ama bogga websaytka OHA: <http://public.health.oregon.gov/HealthyEnvironments/FoodSafety/Pages/variance.aspx>.